



# Xarumo Caafimaad oo Ku Yaala Iskuulada PPS Kuwaasi oo Bixinaya Daryeel Caafimaad iyo Ka Hortaga Cudurada

Oktoobar 29, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Ilaa iyo intii uu bilaabmay xanuunka COVID-19, waxaa jiray hoos u dhaca xad leh oo dhinaca caruurta soo waajahay addeegyadii caafimaadka ee waxyaabihii laga hortagi lahaa sida tallaalada iyo hubintii caafimaadka ilmaha. Waxa aan aad ugu faraxsanahay inaan idin wargalino in aan dib u furnay labo xarumood caafimaad oo ku yaala Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) sidii ay idiin siin lahaayeen ardayda addeegyo caafimaad ay u baahan yihiin iyada oo wali iskuuladii waxbarashadoodii lagu qaadanayo guryaha. Xarumaha caafimaad ee ku yaala iskuuladu waxa ay bixinayaan daryeelo caafimaad oo leh tayo, la awoodi karo oo ay bixinayaan takhtarro iyo kalkaaliyaal caafimaadka caruurta kuwaasi oo dhammaan ah lacag la'aan.

**Xarunta Fayo-qabka Benson (Benson Wellness Center)** waxa ay ku soo biiri doontaa **Xarunta Caafimaadka Ardayda ee Roosevelt** oo noqon doonto xaruntii labaa ee caafimeed kuna taala iskuulada ee dib looga furay Dugsiyada Dadweynaha Portland. Xarumahani waxa ay ardayda siinayaa ikhtiyaar dheeraad ah sidii ay u heli lahaayeen daryeel caafimaad oo ka baxsan daryeel caafimaad ee dhakhtarkooda qoyska ka heli jireen iyo in ardayda aan awalba lahayn daryeel caafimaad helaan gargaarka caafimaadka.

## [Xarunta Fayo-qabka Benson](#)

- **Goobta:** Dugsiga Sarre ee Farsamada Benson, 546 NE 12<sup>th</sup>
- **Addeegyada:** Dhammaan ardayda PPS ee da'doodu u dhaxayso 7 sanno ilaa 21 jir
- **Hay'adaha Iska Kaashaday:** Oregon Health Services University, Multnomah County, Multnomah Education Service District
- **Addeegyada:** In si joogta loo hubiyo caafimaadka ardayda, ardayda ciyaaryahanada ah oo iyagana la hubiyo inay ciyaaraha ciyaari karaan, bixinta daryeel caafimaadka caadiga ah, tallaalada, qiimeynta dhaawacyada, caafimaadka xiska iyo inay qiimeyn ku sameeyaan ardayda isticmaasha maandooriyaasha iyo sidii looga daaweyn lahaa, caafimaadka galmada, su'aalaha kale ee ku saabsan caafimaadka. Xaruntu ma bixiso addeegyada lagu hubinayo cudurka COVID-19, laakiin bukaan socodka waxa ay u dirikaraan goobaha lagu hubiyo cudurka oo wakiilka ay ka yihiin OHSU ama Degmada Multnomah.

- **Haddii aad u baahan tiihin daryeel:** Waxaad wacdaan telefoonka 503-494-8505 iska diiwaangaliya inaad tiihin markii ugu horeysa bukaan socod; waxaad wacdaan telefoonka kale ee ah 503-418-0409 sidii aad ballan u qabsan lahaydeen, inaad la kulantaan dhakhtarka ama aan kula kulantaan qaabka muuqaal baahiyaha. Fadlan waxaad ogaataan in loo baahan marka aad ballanta sameysaneysaa inaad afka soo duubtaa.

### Xarunta Caafimaadka Ardayda ee Roosevelt

- **Goobta:** Dugsiga Sarre ee Roosevelt, 6941 N Central St.
- **Addeegyada :** Dhammaan waxa addeeg la siinayaa ardeyda K-12 iyo dhallinyarada ku nool Degmada Multnomah
- **Daryeel Bixiyaha:** Degmada Multnomah
- **Addeegyada Caafimaad:** Hubinta caafimaadka, hubinta ciyaartoygu inay qabaan caafimaadkii looga baahnaa inay kubadaha kale duwan ciyaari karaan, xanuunka ama dhaawacyada, tallaalka hargabka, hubinta xanuunta COVID-19, caafimaadka taranka, qorista daawooyinka, baaritaanada shaybaarka, la talin.
- **Haddii aad u baahan tiihin daryeel:** Waxaad wacdaan telefoonka 503-988-3909 si aan ballan u qabsantaan (inaad qof ahaan u tagtaan ama muuqaal baahiyah)
- **Ikhtiyaraadka kale:** Arday kasta oo ka mid ardayda wax ka bartata Dugsiyada PPS waa isticmaali karaan, iyaga oo aan bixin wax lacag ah, Xarumaha Caafimaadka Ardayda Multnomaha kuna yaala Dugsiga Sarre ee David Douglas (waxaad wacdaan telefoonka 503-988-3554) iyo sidoo kale kuwa ku yaala Dugsiga Sarre ee Parkrose waxaad wacdaana (503-988-3392), addeegyada ay bixinayaan waxaa ku jira hubinta xanuunka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa [Shabakada Xarunta Caafimaadka Ardayda Multnomah](#).

Sidoo kale, waxa aanu jecelnahay in aan qoysaska xasuusino in la siinayo caymis caafimaad oo bilaash ah arday kasta oo da'diisu tahay 18 sanno ama ka yar, iyada oo aan loo eegi waraaqaha sharciga dalka lagu jooho, waxaana laga siinayaa Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Fadlan waxaad fiirisaa [Macluumaadka dheeraad ee uu sharaxayo OHP](#).

Haddii aad hayso wax su'aalo kuna saabsan addeegyada caafimaadka ardayda, waxaad la soo xiriir kartaa Leti Ayala, Xiriiriyaha Addeegyada Caafimaadka PPS halkani [layalaguillen@pps.net](mailto:layalaguillen@pps.net).